## Meelaha sida joogtada ah looga iibiyo

- Alvesta – Pressbyrån
- Lenhovda – COOP
- Lessebo – COOP
- Ljungby – Hemköp
- Markaryd – COOP
- Tingsryd – Börjes
- Växjö – Xarunta Macaamiisha ee Växjö Resecentrum, Pressbyråer, Dalbo Centrum, Dalbo Skomakeri & Nyckelservice
- Åseda – COOP
- Älmhult – Sydresor

## La xiriir

Xaafiiska 0470-72 75 50

Xarunta Macaamiisha 0771-76 70 76

kundcenter@lanstrafikenkron.se

Länstrafiken Kronoberg

Videum Science Park

351 96 Växjö

Warbixintan waxaa ku jira xulashooyin laga soo bixiyay qoraaladeena safara (Resevillkör) iyo xeerarka safarka. Haddii aad u baahato xog dheeraad ah booqo www.lanstrafikenkron.se

## Boggagayga (Mina Sidor) wax badan ayaad ka helaysaa

Boggagayga (Mina Sidor) waa adeeg bilaash ah ood ka heli karto shabakaddeena internetka, halkaas oo aad ka heli karto qiimo-dhimid iyo adeegyo faa'iido leh.

Mar walba oo aad lacag ku shubato Kaarka Safarka ee Resekortetka adigoo isticmaalayo Boggagayga, waxaad helaysaa 10% qiimo dhimis ama 10% lagu siinayo.

Diwaangali Kaarkaaga Safarka ee Resekortet, waxaadna helaysaa in garantiyo lagaa siiyo hadii kaarku kaa dhumo (tappa-bort gurantee).

**Ogoow!** Marki aad lacag ku shubatid Kaarka Safarka ee Resekortet adigoo isticmaalaya Boggagayga (Mina Sidor), xasuusnoow ma heli kartid lacag ku kaydsan raacitaanka Tareenada Krösa (Krösatågen). Haddii kale isticmaal makiinadaha tigidkeena.

Waxaad in badan ka sii akhrisataa at www.lanstrafikenkron.se

## Adeegga safarka ee MobiTime

Adeegeena MobiTime waxaad jadwalka ku soo dagsan kartaa taleefankaaga, waxaad arki kartaa waqtiga joogsiga, waxaad raadin kartaa safarada aad rabtid, sidoo kalena si toos ah ayaad adeega MobiTime dhexdiisa waxaad ka iibsan kartaa tigidka taleefanka gacanta. Adeegan waad isticmaali kartaa haddii uu taleefankaagu yahay iPhone ama Android. Ka raadi MobiTime App Store dhexdiisa ama Play Butik. Waxaad kaloo fariin ahaan u qori kartaa "LTK" una dir lambarka 0730-15 52 50 waxaad helaysaa cinwaan aad si fudud ugu soo dagsan karto adeegan taleefankaaga.

## Way wanaagsan tahay in aad ogaato

**Gaariga-caruurta**

Gaariga-caruurta bilaash ayaa lagu qaadayaa, hadii uu boos banaan yahay. Lacag le'eg tan caruurta/dhalinyarada da'da yar ayaa laga qaadayaa gaari-gacanada alaabta lagu qaado ee aan caruur saarnayn.

**Baaskiilka**

Baaskiil labo lugoodlaha ah ayaa qofkiiba loo ogol yahay in uu soo saarto Basaska Deegaanka hadii boos loo helo. Lacagta baaskiilka waxay la mid tahay tan caruurta/dhalinyarada da'da yar.

Baaritaanka/Lacag dheeraad ah

Haddii aadan wadan ama aad wadatid cadayn safar oo qaldan marka la isbaarayo, lacag dheeraad ah oo ah SEK 1000 ayaa la qaadayaa.

**Xayawaanka**

Eeyaha, bisadaha, ama xayaawaanka yar-yar waxay ku raacayaan baska/tareenka bilaash, waa inaysan noqon kuwo qaylo badan oo dhiba dadka safraya. Xayaawanka waa inay ku jiraan xarig, sanduuqa lagu qaado ama koley xiliga safarka

xayawaanka lama saari karo kuraasta lagu fadhiisto dushooda.

**Boorsooyinka gacanta**

Waxaad qaadan kartaa boorsooyinka gacanta intii aad doontid, kuwaas oo aad si fudud u wadan kartid, waana bilaash. Lama ogola inaad meeshii laga bixi lahaa aad dhigtid ama aad boorsooyinka saarto kuraasta korkooda.

**Cabida sigaarka**

Waa mamnuuc in sigaar lagu dhex cabo baska, tareenka, meelaha lagu sugo gaadiidka ama gabaadyadaba la jirsado.

Mar kasta oo aad booqanayso xarun caafimaad waxad ku raacaysaa basaskayaga bilaash adiga oo marka aad sii socoto tusaya warqadda ballanta, marka aad soo socotana rasiidhka xarunta caafimaadka. Haddii aad doonto waxad baska kaash kaga iibsan kartaa tidh, qarashka tigidhkana waxa lagaa jarayaa marka aad bixinayso khidmadda caafimaadka. FG! Haddii aad kaash kaga iibsato baska dhexdiisa waxa ku fuulaysa 20 kr oo dheeraad ah oo aad adigu isu qabayso.

Haddii aad tareen raacayso waa in aad mar walba iibsato tigidh. Markaa tigidhkaaga iyo rasiidhka khidmadda caafimaadka u soo dir xafiiska adeegga safarrada (Serviceresor).

**Makiinadaha tikidka waxaad ka heli kartaa dhamaan xarumaha gaadiidka ee dagmada.**

Tigid mar ah ee bas iyo tareenka, SEK

| Inta aag ee loo safrayo | Caruur iyo dhalinyaro da ´yar 0-19 | Qof ka weyn 20+ sano | Lamaane/ Qoys |
|---|---|---|---|
| 1 | 16 | 26 | 47 |
| 2 | 22 | 37 | 67 |
| 3 | 29 | 48 | 86 |
| 4 | 35 | 59 | 106 |
| 5 | 42 | 70 | 126 |
| 6 | 49 | 81 | 146 |
| 7 | 55 | 92 | 166 |
| 8 | 62 | 103 | 185 |
| 9 | 68 | 114 | 205 |
| 10 | 75 | 125 | 225 |
| 11 | 82 | 136 | 245 |
| 12+ | 88 | 147 | 265 |

Kaarka Safarka ee E-purse oo hal socdaal ah, SEK

| Inta aag ee loo safrayo | Caruur iyo dhalinyaro da ´yar 0-19 | Qof ka weyn 20+ sano | Lamaane/ Qoys Ilaa iyo 5 qof, ugu badnaan laba qof oo waaweyn |
|---|---|---|---|
| 1 | 12,80 | 20,80 | 37,60 |
| 2 | 17,60 | 29,60 | 53,60 |
| 3 | 23,20 | 38,40 | 68,80 |
| 4 | 28,00 | 47,20 | 84,80 |
| 5 | 33,60 | 56,00 | 100,80 |
| 6 | 39,20 | 64,80 | 116,80 |
| 7 | 44,00 | 73,60 | 132,80 |
| 8 | 49,60 | 82,40 | 148,00 |
| 9 | 54,40 | 91,20 | 164,00 |
| 10 | 60,00 | 100,00 | 180,00 |
| 11 | 65,60 | 108,80 | 196,00 |
| 12+ | 70,40 | 117,60 | 212,00 |

*Somaliska*

# Ku safridda Länstrafiken Kronoberg

## - bas iyo tareen.



Länstrafiken Kronoberg

## Noocyo kala duwan oo dokumiintiga socdaalka ah

**Tigid mar ah – lacag – kaarka Resekortet ee qiimo-dhimista**

kuwa socdaalkoodu uusan badnayn ama meelo kala duwan u safra.

**Kaarka xiliga leh – dadka waaweyn – dhalinyarada – ardayda**

Safar 30 maalmood ah oo aan xadidnayn, oo ah hal marin

**Kaar maalmeed**

Dadku ma iibsan karaan laakiin waxaa lagu bixiyaa markii muhiim loo arko.

## Noocyada Tigidka/Xadiddaada Da'da

**Tigidka** qofka weyn wuxuu ka bilawdaa 20 sano, qiimahiisuna waa qiimaha caadiga ah.

**Caruurta/dhalinyarada da'da yar ilaa 19 sano** waxaa laga dhimayaa 40% qiimaha caadiga ah.

**Caruurta ka yar da'da 6 sano** safarkoodu waa bilaash haddii ay la socdaan qof weyn oo bixinayo qiimaha qofka weyn (qofka weyn looma ogola in ka badan 2 caruur ah). Caruurta aan la socon qof bixinaya qiimaha qofka weyn, waxay bixinayaan qiimaha caruurta/Dhalinyarada da'da yar.

## Tigidka Lamaanaha/Qoyska

Tigidka lamaanaha/qoyska waxaad ku safri kartaa qiimo jaban.

Tigidku wuxuu u shaqaynayaa ilaa 5 qof, kuwaas oo labo ka mid ahi ay tahay dad waaweyn. Qiimuhu wuxuu 10% ka jaban yahay tigidka laba qof oo waaweyn.

Qofkasta oo ay u buuxsanto da'da 20 waxaa lagu xisaabinayaa qof weyn

Waa macquul in Tigidka Lamaanaha/Qoyska lala isticmaalo Kaarka Qiimo-dhimidda ee Resekortet, taas oo laga helayo 20% qiimo dhimis oo dheeri ah.

Qiimaha Lamaanaha/Qoyska mar walba faa'iido ayuu leeyahay marka laba qof oo waaweyn safrayso.

Dadka safraya da'doodu waxay isbadalaysaa marka ay galaan da'da tobobo ama labaatan. Haddii laga shakiyo da'da qofka safraya, waxaa loo baahanyahay cadayn marka loo baahdo, haddii kale waxaa loo xisaabayaa qiimaha da'da ku soo xigta.

## Tigid mar ah

Tigidka marka ah waxaa isticmaala kuwa safarkoodu uusan badnayn ama meelo kala duwan u safra.

Tigidka marka ah qiimihiisa waxuu ku xiranyahay inta aag oo aad u safraysid iyo da'ada qofka safraya. Haddii loo safrayo magaalada Växjö safarkaa waxuu gaarayaa 1 aag.

## Qiimo-dhimidda iyo Xiliyada Resekortet

### Kaarka Safarka - Resekortet

Kaarka Safarka – Resekortet ma aha mid qof kaliya ku xiran, kaarka saaxiibkaa ama qof qoyska ka mid ah ayaad daymin kartaa hadii aadan isticmaalayn.

Waxaad lacag ugu shuban kartaa Kaarkaaga Safarka- Resekortet si aad xili ugu safarto ama waxaad ugu shuban kartaa in aad qiimo dhimid ku hesho ama labadaba.

**Xiliyada**



Kaarka Resekortet ee Xiliga leh, marin hore loo cayimay ayuu ku shaqaynayaa 30 beri oo aan xadid lahayn.

*Haddii aad mar walba sofarto oo marinkaagu u dhaafayo aag dhow, waxaa faa'iido leh in la isticmaalo Kaarka Resekortet ee Xiliga leh.*

*Kaarkan waad ku dooran kartaa marinka aad maraysid. Xitaa waxaad dooran kartaa inaad isku darto bas iyo tareen ama bas kaliya.*

Kaar Resekortet-ka Xiliga leh ee Tareenka wuxuu kaliyoo shaqaynayaa markii aad la wadatid risiidka baaridda. Risiidka baariddu waa inuu muujinayo wakhti uu bilowday oo socda, waana in la wato marka la saaran yahay tareenka gudaha iyo dibadda Degmada Kronoberg.

Risiidka baaridda waxaad ka heli kartaa makiinadda tigidka, goobaha lagu gado ama baska dhexdiisa.

**Kaarka Qiimo-dhimidda Resekortet**

Ku shub kaarkan la buuxin karo qiime u qaybsami karta SEK 100. Markii aad tigidkaaga marka kaliya ah ku bixisid Kaarka Qiimo-dhimidda Resekortet waxaad helaysaa 20% qiimo dhimis ah oo ka go'aysa qiimaha caadiga ah.

**Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh – 30 maalmood**

**- Dadka markasta safra!**

Waxaad lacag ku shuban kartaa kaarkaaga Resekortet oo shaqaynaya mudo 30 beri ah, laguna gali karo safar aan xadidnayn oo ah marin hore loo xadiday.

**Caruurta/Dhalinyarada Da'da yar ee u dhaxaysa 0-19 sano**

– waxay ku iibsan karaan Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh 25% oo qiimo dhimis ah

Caruurta/Dhalinyarada Da'da yar oo wata Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh waa inay tusaan aqoonsi sharciyeesan si ay u cadeeyaan da'dooda saxda ah.

**Ardayda**

– waxaanu Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh ku bixinaa 25% qiimo dhimis ah.

Ardayda wadato Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh,- ardaydu waa inay tusaan kaarka Mecenat ama Kaarka Ardaynimo, sidoo kale aqoonsi sharciyeesan. Kaarka Resekortetka ee Xiliga leh- Ardaygu wuxuu u isticmaali karaa dagmada Kronoberg gudaheeda iyo tareenka aado Kalmar.

## Soo-celinta

Qofka safrayo asaga ayaa mas'uul ka ah hadduu dhumo ama Kaarka Safarku uu ka halaabo. Kaararka cilad farsamo ay ku timaado waxaa bilaash looga badali karaa Xarunti Macaamiisha ama xaafiiskayaga.

Tigidyada lacagta cadaanka iyo kaararka qiimaha jaban la iskama celin karo.

Kaarka Safarka ee Resekortet oo shaqayndoona mudo soo socota, waxaa laga soo celindoonaa Xarunteena Macaamiisha waxaana laga qaadayaa lacag-adeeg oo dhan SEK 50

Haddii aad badalanaysid aagga ama aad u gudbayso kaar ka qaalisan, hadii kaarku bilaaban doono mudo soo socota, waa la samayn karaa iyada oo aan lacag-adeeg la qaadin.

In aad u gudubto kaar ka qaalisan waa la samayn karaa inta lagu jiro xiliga shaqaynta kaarka inkasta oo aan wax laga badalayn xiliga shaqaynta.

Kaarka Safarka ee Resetorket ee waqtigiisu shaqaynayo waxaa lagu celin karaa sida uu tilmaamayo jadwalka hoose.

| Maalmaha shaqayntiisa ka hartay | % qiimaha kaarka ee la dhaafay |
|---|---|
| 1 | 80 % |
| 2 | 60 % |
| 3 | 50 % |
| 4 | 40 % |
| 5 | 30 % |
| 6 | 20 % |
| 7 | 10 % |

## Kaarka Resekortet ee Halka Maalin ah

Kaarkani lama iibsado laakiin waxaa lagu bixiyaa baahida degmada iyo hay'adaha dowladda. Kaarka Halka Maalin ah waxuu shaqaynayaa hal maalin, waxaana isticmaalaya hal qof hal maalin. Kaarka looma isticmaali karo safar habeyn ama in tareen lagu raaco.

Kaarka wuxuu shaqada bilaabayaa marks la isticmaalo marka ugu horaysa, wuxuuna shaqaynayaa inta ka dhiman maalinta ilaa saqda-dhexe.

*Marka, kaarka iyo safarada la isticmaalo kaarka waxaa loo celiyaa Länstrafiken.*

## Bas raacid bilaash ah marka la aadayo ama laga imaanayo daaweyn caafimaad

Si bilaash ah ayaad ku raaci kartaa baska haddii aad darawalka tustid warqaddaada balanka (kallelse) ee rug-caafimaad oo degmada ku taal, soo noqodkana waxaad tusi kartaa risiidka rugta-caafimaadka. Haddii aadan haynin wax warqad balan ah ama aadan rabin inaad tustid waxaad ku dhiibi kartaa lacag ahaan, kadib tigidka iyo warqadaha rugta-caafimaad waxaad u dirtaa Serviceresor, Videum, 351 96 Växjö. Goloha dagmada (Landstinget) ayaa dib kuu siin doonta inti kaaga baxday raacida baska, micnaha lacagtii lagu bixiyay Kaarka debit-ka ama Kaarka Qiima-dhimista ee Resekortetka. **Haddii aad lacag cadaan ah bixisay, lacag dheeri ah oo ay leedahay Länstrafiken oo dhan SEK 20 laguuma celindoono.**

## Sida loo bixiyo lacagta bas raaca

- Kaarka Safarka ee Resekortet, ee lagushubay lacag Xiliyeed, iyo/ama Kaarka Safarka ee Qiimo-dhimista.
- Inaad ku bixiso kaarka Debit-ka- basaska Länstrafiken Kronoberg's waxaa ku yaala meelo lagu isticmaalo Debit kaarka. Waxay ku shaqeeyaan MasterCard iyo VISA.
- Tigidka taleefanka gacanta. Ka iibso adigoo isticmaalayo adeega MobiTime. Marka ugu horeesa waxaad ku diwaan gashataa Debit kaar, MasterCard ama VISA ama adeega qiimo-dirka ee Klarna. Waxaad si toos ah xogta uga buuxisaa taleefanka gacanta. Waxaad ka iibsan kartaa tigidkaaga taleefankaaga gacanta 20 daqiiqo ka hor xiliga safarkaaga. Tigidka waa in aad iibsataa inta aadan fuulin gaadiidka.
- Haddii aad lacagta cadaan ku bixinayso baska gudihiisa. Waxaa ku raacayo lacag dheeraad ah oo ah SEK 20. Ma jiraan wax lacag dheeraad ah oo ku raacayo haddii aad ku gadatid tigidkaaga debit kaar, taleefanka gacanta ama Kaarka Safarka ee Resekortet.
- Waxaad kaloo ka iibsan kartaa tigidka Xarunta Macaamiisha ama goobaha iibinta ee la xiriira safarkaaga.

## Sida loo bixiyo lacagta tareen raacaaga - Öresundståg (Tareenka Öresund) ama Krösatåg (Tareenka Krösa)

- Kaarka Resekortet ee Xiliga leh oo lagu shubay xili socda. Ogoow waa inaad haysatid rasiid baarid oo shaqaynayo.
- Kaarka Resekortet ee Qiimo-dhimista. Iibso tigidkaaga ka hor safarkaaga. Waxaad ka iibsan kartaa tigidka Xarunta Macaamiisha ama goobaha iibinta ee la xiriira safarkaaga.
- Makiinadaha tikidka. Tigidkaaga iibso ka hor inta aadan safrin. Waxaad ku bixin kartaa kaarka Resekortet ee Qiimo-dhimista ama Kaarka Debit (VISA/MasterCard/Diners/American Express).
- Adoo saaran Tareenka Öresund (Öresundståg) waad iibsan kartaa tigidkaaga safarka gudaha dagmada Kronoberg, adoo dhiibayo lacag cadaan ah, waxaadna ku daraysaa SEK 100.
- Markaad saarantahay Tareenka Krösa (Krösatågen) waad iibsan kartaa tigidkaaga waxaadna lacagta ku bixin kartaa adoo isticmaalaya Kaarka Resekortet ee Qiima-dhimista. Waxaad kaloo ku bixin kartaa kaarka debit ama lacag cadaan ah oo aan qarash kale lagu saarin.